

## Talooyin Kooban

Kormeer Joogto ah: Dibadda

Kormeerka joogtadda ahi waa mid leh il-ku hayn dhageysi, macaamil, kormeer, iyo ka hortag. Wawa kale oo ka midda foojignaan iyo wax ka qabad hadii khatari timaado.

Kormeerka joogtada ahi wuxuu faa'iido leeyahay marka daryeelihu:

- Yaqaan ilmo walba heerka wax qabadkiisu gaarsiisan yahay.
- Dejiyo sharchiyo qayaxan oo khatarta loogga hortagi karo.
- Fahamsan yahay khataraha nabadgelyo ee imaan kara.
- Joogteeyo kormeerka dhan walba ah.
- Isha-mariyo, tiriyo, oo kormeero meelaha lagu ciyaaro.
- Dhanka wanaagsan wax ka eego si loo fahmo waxa ammaanka ah oo khatar keeni Karin.
- Baro carruurta sida ugu habboon ee loo isticmaalo nooc walba oo qalabka ciyaarta ka mid ah (Isticmaalayana lugaha-hore).

## Dhowrisa Amaanka Marka Caruurta Dibadda Joogaan

Ciyaarta banaanka waa mid ilmuu dhaqdhaqaad si'yaado ah samayn sidaa darteed waxay u baahan doonaan kormeer ka badan markay gudaha joogaan. Mar walba isku miisaamaya tiradda daryeelaha iyo tan carruurta.

- Tababar gaar ah in la siiyo iyo dhamaan meelaha lagu ciyaaro laggu qoro daryeelle

kormeera dibadda meel walba oo lagu ciyaarayo.

- Sheeko dheeraada ama ciyaar lala yeelan cunug gaara ama koox carruurta ka mida(ama shaqaale) inta kormeerku jiro. Isku day in daryelayaashu qaar loo xilsaaro kormeera, qaarna ilamaha inay ciyaarsiiyaan ama la sheekystaan.
- Ku meeleyn iyo u xilsarid shaqaalahi inay ilaaliyaan dhammaan carruurta wada joogta halii meelaba.
- U dhowaansho gaar ahaan carruurta xirfadaha cusub baranaya sidda socodka, orodkan oo taageero dheeraada u baahan si loo hubiyo ammaankooda.
- Awood u lahaanshaha inaad u yeeri karto qof wayn oo kale lacala hadii caawimaad loo baahdo iyadoon carruurta laga tegin.

## Naqshadaynta iyo Qalabaynta Goobta Ciyaarta

Hubinta ammaanka goobaha ciyaartu waa mas'uuliyad daryeelaha saaran. Naqshadeynta goobta ciyaarta iyo qalabayntu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah kormeerka.

- Qalabka ciyaarta oo loo qaabeeyo hab dadka waaweyni si fudud u arki karo carruurta oo dhan wakhti kasta. Waa inaysan jirin meelo kala qarin kara ilmaha iyo daryeelaha sida (luuqluuqyo la galo, dhismo xiran ...)
- Magacow meelaha inta badan "dhibta leh" caruurtuna u baahan tahay gargaar, dadka waaweyna ku adag tahay inay arkaan carruurta.
- Daryelayaashu waa inay si laga fakaray isugu qaybi yaan oo kormeeraan dhammaan

aagagga. Waa inay joogaan meelo kala duwan, eegaan oo dhagaystaan si wanaagsan ula macaamilaan carruurta.

- Dadka waaweyni waa inaysan meel qura is wada taagin ama wada fadhiisan.

### Jawigga Xaaladda Dibadda

Si looga hortago dhaawacyada shilalka ka yimaada, si taxaddar leh waa in loo kormeero maalin walba goobaha ciyaarta, qalabka, iyo aagagga kale ee lagu ciyaaro maalin walba intaan caruuerta dibada la geyn. Fiiri oo hagaaji waxii khatar ah oo aragto intaan caruuerta loo oggolaan inay dibadda ku ciyaaraan:

### Qalabka iyo Meelaha Lagu Ciyaaro

- Qaybo maqan ama jaban; meelaha gacanta lagu qabsado liiqliiqanayn.
- Masaabiirta, boolalasha iwm oo aan soo baxsanayn.
- Miridh ama rinji diirmada.
- Dhinacyo fiiqan, ka fuqay, ama meelo wax xagan.
- Dildilaacyo muuqda.
- Sugidda qalabka waaweyn oo meel ku tiirsanayn sida guryaha lagu ciyaaro.
- Duugoow iyo baa'ba.
- Meelo aad u kulul ama u qabow taabashadeeduna carruurta waxyeli karto.

### Jawigga Deegaanka

- Qashinka sida quraaradaha, sigaarka, dabadiisa, wasaqda dhulka daadsan, iwm.
- Saxarada xoolaha iyo waxyalo aan la ogayn waxay ka samaysan yihii.
- Biyo fadhiya, baraf adag, iyo ka da'ay
- Waxyaalaha dabiiciga ah sida dhagxaanta fiiqan, jirridaha, xididdada, iyo laamaha waxyelo gaysan kara.
- Cayayaanka waxyelka leh sida wariiriga, shinnida, iwm.

- Godad, duleelo, ceelal, dabinno, dildilaacyo.
- Qalabka ama fillooyinka korantada oo jaban ama duugoobay.
- Xarig koronto ama qalab koronto.

### Kormeer iyo Tirokoobka

Kormeer joogto ah ayaa ah aaladda ugu fiican ee looga hortago dhaawaca iyo caqabadaha dhaca. Kormeerk joogtada ahi waa — indho indhayn, u fiirsasho, iyo ka baarandeg— kani waa furaha dhowrista amaanka caruuerta. Kormeer oo tiri adigoo adeegsan xeeladaha soo socda si aad u hubiso in carruurtu dhan yihii mar walba:

- Marka aad tirinayto, muuqaal iyo magacyada cunug walba isku soo qabo oo mid ka yeel.
- Joogto u tiri ilmaha ha noqoto marka u dhexaysa casharada ama hawlaha ay qabtaan bilaabaan ama joojiyaan. **Tirokoob carruurta qiyastii 15kii daqqiqaaba mar.**
- Waa inaad awood u leedahay inaad sheegi karto caddada tirada carruurta daryeelkaaga ku jira.
- Tirokoob walba oo qaado ku diiwaan-geli xaashida imaanshaha.
- Qor carruur kasta oo baxa ama kuwa ka maqan kooxda sida kuwa hore loo qaado.

### Wax Ka Qabashada Dhaawacyada

Dhaawacyo ayaa dhici kara. Daryeeluhu waa inuu u diyaargaroobo in si dhakhso leh uga jawaabo ama wax uga qabto hadii cunug ama qof weyni dhaawac gaaraan. Ku dadaal in barnaamijku haysto qalabka gargaarka degdeggaa ah oo dhamaystiran loona qaato banaanka marka carruurtu dibada joogaan, iyo in dhamaan daryeelayaashu haystaan tababarka gargaarka degdeggaa ah iyo CPR ka oo aan dhicin.

Haddii dhaawac dhaco:

- Isdeji.
- Si dhakhso leh uga jawaab adigoo adeegsanaya wixii aad ka baratay tabaradii gargaarka degdegga ah. Isha mari oo fiiri goobta si aad u qiimayso waxa khaldan iyo wixii laga qaban lahaa.
- Go'aan ka gaadh inay tahay macquul in la wajaho iyo in kale.
- Hubso ilmaha aad u timid ama u joogto inaad caawiso.
- Weydii su'aalo, eegna dhaawacyada.
- U fiirso calaamadaha iyo astaamaha tilmaamaya in dhaawacu yahay mid fudud, culus, ama nolosha khatar gelin kara.
- Haddii dhaawacu **khatar gelinayn nafta**, sii wad su'aalaha iyo la soco neefsashada iyo garaaca wadnaha.
- Samee wax kasta oo gargaarka deg-deg ah qaabilsan oo loo baahan yahay.
- Ha dhaqaajin ilmaha in noloshoodu khatar ku jirto mooyee.
- Go'aan gaar in gargaarka caafimaadka degdegga ah (EMS) tahay in la waco ama lala xiriiro. Haddii ilmuu aanu neefsanayn, u samee CPR hadba sidii loogu baahdo.
- Wac qoyska cunuga.
- La raac cunuga gaariga ambalaaska. Soo qaado dukumiinti kasta oo khuseeya iyo meelihii dadka lagala xiriiri lahaa hadii loo baahdo.
- Diiwaangeli dhaawaca adoo isticmaalaya foomamka shilalka oo laga gelo goobaha shaqooyinka.

Xog dheeraad ah

Caring for Our Children: National Health and Safety Performance Standards

<https://nrckids.org/CFOC/Database/2.2.0.1>

Head Start | ECLKC: Active Supervision

<https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/safety-practices/article/active-supervision>

Virtual Lab School

<https://www.virtuallabschool.org/preschool/safe-environments/lesson-1>

Wixii macluumaaad dheeraad ah, booqo  
[www.inclusivechildcare.org](http://www.inclusivechildcare.org).

Copyright © 2021 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeeddooyin waxbarasho. Macluumaaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.